

SO

# *“Waxaan magangalyo waydiistay eu – wadankee maarayn doona sheegashadayda?”*

A

**Warbixinta codsadayaasha ee ku saabsan xeerarka dublin ee magangalyo siinta caalamiga ah sida uu qabo qodabka 4 ee xeerka (eu) lambarkiisu yahay 604/2013**

Waxaad nawaydiisatay inaan magangalyo ku siino sababtoo ah waxaa lagugu khasbay inaad ka baxdo wadaankaad u dhalatay taas oo ay sababtay cadaadin, dagaal, ama waxyeelo khatar ah. Sharcigu wuxuu arintan iyada ah ugu yeedhaa 'dalbasho/codsi magangalyo caalami ah' adigana waxaa laguugu yeedhaa 'codsade'. Dadka magangalyada raadinayana waxaa la dhahaa 'magangalyo doon'.

**Xaqiiqada ah in aad halkan magan galyo weydiisatay ma ballan qaadayso in aanu halkan ku baari doona codsigaaga. Dalka baari doona codsigaaga waxaa lagu go'aamiyaa iyadoo la raacayo hab uu dajiyay sharciga Midowga Yurub oo loo yaqaan 'Xeerka Dublin' (Dublin Regulation). Sida uu sharciganu qabo, hal dal oo kaliya ayaa ka mas'uul ah baarista codsigaaga.**


Sharcigani wuxuu ku dabakhmayaa dhamaan gobalka juqruaafi ahaan ay ku jiraan 32 dal . Warqaddan darteed, waxaan ugu yeereynaa 32dan dal 'wadamada Dublin'.

**Haddii ay jirto waxyaabo warqaddan ku qoran oo aadan fahmin, fadlan weydii maamulkayaga.**

Ka hor inta aan tixgalin la siin codsigaaga magan-galyo doonka, waxaan u baahan nahay in aan ogaano in aanu masuul ka nahay baadhitaanka ama in uu dal kale mas'uul ka yahay – tan waxaan ugu yeernaa 'nidaamka Dublin'. Xeerka Dublin ma qusayso sababta aad u dalbanayso magangalyada. Waxaa kaliya oo khusaysa su'aasha ah wadankee ka masuul ah in uu go'aan ka gaaro codsigaaga magangelyada.

**Warqadan waxaa loogu talagalay warbixin kali ah. Hadafka laga leeyahay waa in la siiyo dalbadayaasha raadinaya magangalyada caalamiga ah warbixin ku haboon sida uu qabo nidaamka Dublin. Iyadu ma abuurayso/keenayso xuquuq ama waajibaad sharci ah. Xuquuqaha iyo waajibaadka Gobalka iyo shakhsigaba waxaa cadeeyay nidaamka Dublin waxaana lagu dajiyay Xeerka (EU) 604/2013.**

**©Midowga Yurub 2014**
**Dib usoosaaridda waa la ogalyahay. Wixii isticmaalid ah ama dib usoo saarid sawirada shakhsiga ah, waa in ogalaansho laga dalbadaa cidda tooska u leh xuquuqda daabacaadda.**




*Wadamada Dublin waxaa ku jira 28ka waden ee Midowga Yurub Ayrlandi (IE), Biljam (BE), Bolaandi (PL), Bulgeriya (BG), Danmarki (DK), Faransa (FR), Fiilaan (FI), Giriig (EL), Hangari (HU), Isbayn (ES), Isloofaakiya (SK), Isloofeeniya (SI), Istooniya (EE), Iswiidhan (SE), Jarnani (DE), Jeeg Ribablik (CZ), Karooshiya (HR), Khubras (CY), Laadfiya (LV), Laxanbargi (LX), Litu'aaniya (LT), Malta (MT), Nedarlandi (NL), Ostariya (AT), Purtaqiis (PT), Roomaaniya (RO), Talyaani (IT), Yunaytidh Kiingidhoom (UK), iyo sidoo kale 4ta wadan ee la « xiriirta » Xeerka Dublin Noorwey (NO), Ayslaandhi (IS), Iswiisarlaandhi (CH), iyo Lijtenistiin (LI).*

## “Intee in le eg ayay qaadanaysaa in la go’aansado dalka tixgalinta siin doona codsigayga? “

## “Intee in le eg ayay noqon doontaa mudada codsigayga la baarayo?“

Haddii maamulkayagu uu go’aan ku gaadho in aan masuul ka nahay go’aansashada codsigaaga magangelyada, taas macnaheedu waxaa weeye waxaad joogi kartaa wadankan codsdigaagana halkan ayaa lagu baarayaa. Geedi socodka baarista codsigaaguna si dhakhso ah buu u bilaabmi doonaa.

Haddii aan go’aansano in wadan kale uu masuul kayahay codsigaaga, waxaan u howlgali doonaa sidii aan kuugu diri lahayn wadankaas sida ugu dhakhsaha badan, si ay codsigaaga halkaas ugu qiimeeyaan. Mudada nidaamka Dublin oo dhan, illaa inta lagaaga wareejinayo wadankaas **waxay, sida caadiga ah qaadan kartaa ilaa 11 bilood**. Codsigaaga magan-galyo raadinta waxaa markaas kadib lagu baari doonaa wadanka masuulka ka ah. Waqtigu wuu ka duwanaan karaa sidan haddii aad ka dhuumatid maamulka, haddii lagu xidho ama meel lagugu hayo, ama haddii aad racfaan ka qaadato go’aanka wareejinta. Haddii aad ku jirto mid un ka mid ah xaaladahan, waxaad heli doontaa warbixin khaas ah oo kuu sheegaysa wakhtiga ay arimuhu kugu qaadan karaan. Haddii lagu xidho, waxaa laguu sheegi doonaa sababta xidhitaanka iyo xuquuqda sharci ee laguu heli karo.



©European Union

## “Sidee loo go’aansadaa wadanka masuulka ka ah codsigayga?”



©iStockphoto / Joe Gough

Sharciga ayaa dajiya sababaha badan ee uu wadan masuul uga noqon karo baadhista codsigaaga. Sababahan ayaa la tixgaliyaa sida uu sharcigu amrayo, iyadoo laga bilaabayo in uu jiro xubin qoyskaaga ka mid ah oo jooga wadankaas Dublin katirsan; in aad hadda ama horaan u heshay fiise ama sharci deganaansho oo uu soo saaray dal Dublin katirsan, ama inaad u safartay, ama aad sii martay, dal kale oo Dublin katirsan, si sharci ah ama si aan joogto ahayn.

**Waxaa muhiim ah in sida ugu dhaqsaha badan aad noogu soo sheegtid haddii ay xubno qoyskaaga ka mid ah ay joogaan wadan kale oo Dublin ka tirsan.** Haddii ninkaaga, xaaskaaga ama ilmahaagu uu yahay codsadaha magangalyada ama magangalyo caalami ah laga siiyay dal kale oo ka tirsan Dublin, waddankaas ayaa masuul ka noqon kara codsigaaga magangalyo.

Waxaa laga yaabaa inaan go’aansano inaan codsigaaga ku baarno wadankan, xataa haddii baaritaanka noocaas ah uusan ahayn masuuliyaddanada taasoo hoos imaanaysa shuruudaha u dagsan ee Xeerka Dublin. Kuuma diri doono wadan la ogyahay in lagu xadgudbi karo xuquuqdaada aadaninimo.

## “Maxaa dhacaya haddii aanan rabin in aan aado waddan kale?”

Waxaad fursad u leedahay in aad sheegto in aadan ku raacsaneyn go’aanka ah in laguu diro dal kale oo Dublin ka tirsan, waxaadna go’aankaas kaga hor imaan kartaa maxkamadda horteeda. Waxaad kale oo aad weydiisan kartaa in aad ku sii nagaato wadankan ilaa inta go’aan laga gaarayo racafaanka.

Haddii aad iskaga tagto codsigaaga magangalyo raadiska oo aad u kacdo wadan kale oo Dublin katirsan, waxaa suurogal ah in dib laguugu soo wareejiyo dalkaas ama wadanka masuulka ka ah.

**Sidaa darteed waa muhiim in marka aad ka dalbato magangalyo, aad joogtid halkan ilaa aan go’aansano 1) cidda mas’uulka ka ah baarista codsigaaga magangalyo doonka ah iyo/ama 2) in lagu baaro codsigaaga magan-galyo doonka ah wadankan.**

**Fadlan la soco in haddii ay nala noqoto in ay u badantahay inaad baxsato ama aad naga dhuumato, iyadoo ay sababtu tahay in aadan rabin in laguu diro dal kale, waxaa lagu gelin karaa meel lagugu hayo (xarun xidhan). Haddii ay sidaas tahay, waxaad xaq u yeelan doontaa inaad hesho wakiil sharci anagaana kula socodsiin doona xuquuqahaaga kale, oo ay ku jirto xaqqa aad u leedahay inaad racfaan ka qaadato xidhitaankaaga.**



©iStockphoto / janp013

## “Maxaa la ii waydiinayaa in faro la iga qaado?“

Marka aad xarayso codsi magan galyo, haddii aad tahay 14 sano jir ama ka weyn, Faraha ayaa lagaa qaadayaa waxaana loo gudbin doonaa kaydka xogta faraha ee la dhaho ‘Eurodac’. **Waa in aad iskaashi ka samaysaa habkan – sharciga ayaa kugu waajib yeelay in faraha lagaa qaado.**

Haddii faraha lagaa qaado aysan tayadoodu wanaagsanayn, oo ay ku jirto in aad si ula kac ah u dhaawacday farahaaga, mustaqbalka ayaa faraha lagaa qaadi doonaa.

Farahaaga ayaa laga eegi doonaa sistamka Eurodac si looga fiiriyo in aad hadda ka hor waligaa magangalyo codsatay ama looga eego in horaan faraha lagaaga qaaday xuduudda. Tani waxay caawinaysaa in la go’aansado wadanka Dublin katirsan ee masuulka ka noqonaya baadhitaanka codsigaaga magangalyo doonka ah.

Waxaa sidoo kale macquul ah in farahaaga laga fiiriyo Sistamka Warbixinta Fiisaha (VIS), kaasoo ah kayd xog oo ay ku jirto warbixinta la xiriirta

fiisooyinka laga bixiyay wadamada la isku yiraahdo Shangan (Schengen area). Haddii aad hadda ama horey uga heshay fiiso wadan kale oo Dublin katirsan, waxaa laga yaabaa in halkaas laguu diro si ay u tixgaliyaan codsigaaga aad ku donayso magangalyada caalamig ah.

Maadaama aad samaysay codsi magan galyo, xogta farahaaga waxaa lagu kaydin doonaa Eurodac 10 sano - 10 sano ka dib, waxay si otomaatig ah uga tirtirmi doonaan Eurodac. Haddii aad ku guulaysato codsigaaga magan galyo, farahaagu waxay ku jiri doonaan kaydka xogta illaa ay si otomaatig ah uga tirtirmaan.Haddii aad muwaadin ka noqoto waddan Dublin katirsan, farahaaga waa laga tirtirayaa meeshaas. Faraahaga iyo jinsigaaga waxaa lagu kaydin doonaa Eurodac - magacaaga, sawirkaaga, taariikhda dhalashada iyo sinjiga aad u dhalatay looma diri doona kaydka xogta Eurodac, laakiin waxaa lagu kaydin karaa kaydka xogta ee qaranka.

Waxaad markasta mustaqbalka na waydiisna kartaa xogta adiga kugu saabsan ee aan ku kaydinay Eurodac. Haddii aad u malayso in xogtu aysan saxsanayn, ama aysan haboonayn in la kaydiyo, waxaad waydiisan kartaa in la saxo ama la tirtiro. **Warbixnta ku saabsan maamulka masuulka ka ah haynta (ama ilaalinta) xogtaada wadankan iyo maamulka la midka ah ee masuulka ka ah la socoshada ilaalinta xogta waxaa laga heli karaa [bogga. 11]**

Eurodac waxaa ku shaqeeya Haayad uu leeyahay Midowga Yurub oo la dhaho eu-LISA. Xogtaada waxaa kali ah oo loo siticmaali karaa ujeedooyinka uu sharcigu qeexay. Waxaa xogtaada heli kara Sistamka Dhexe ee Eurodac oo kaliya. Haddii aad mustaqbalka magangalyo ka codsato wadan kale oo Dublin ka tirsan, farahaaga waxaa loo diri doonaa wadankaas si loo xaqiijiyo. Xogta ku kaydsan Eurodac lalama wadaaagi doono wadan kale ama urur ka baxsan wadamada Dublin.

Marka la gaaro 20ka Julaay 2015, farahaaga waxaa baadhi kara maamulada sida booliska iyo xafiiska booliska Yurub (Europol) kuwaas oo codsan kara in ay galaangal u yeeshaan kaydka xogta Eurodac iyadoo ay ujeedadu tahay ka hortagga, dareemidda iyo baadhista dembiyada khatarta ah iyo argagixisada.

## “Maxay yihiin xuquuqaha aan leeyahay inta lagu gudo jiro mudada uu go’aanka gaarayo wadanka codsigayga masuulka ka ah?”

Waxaad xaq u leedahay inaad joogtid wadankan haddii aan masuul ka nahay baadhista codsigaaga magangalyo doonka, ama, marka uu wadan kale masuul kayahay, ilaa inta halkaas lagaaga wareejinayo. Haddii uu wadankan masuul kayahay baadhista codsigaaga magangalyo, waxaad xaq u leedahay inaad halkan sii joogto ugu yaraan ilaa inta go’aanka koobaad laga qaadanayo codsigaaga magangalyo. Sidoo kale waxaad leedahay taageero maaddi ah oo lagaa siinayo goobta soo dhawaynta, tusaale ahaan hoyi, cunto, iwm, iyo sidoo kale daryeelka caafimaadd ee asaasiga ah iyo caawinta caafimaad ee amarjansiga ah. Waxaa lagu siin doonaa fursadda aad nagu siinayso warbixinta ku saabsan xaaladaada iyo haddii ay jiraan dad qoyskaaga ka mid ah oo jooga wadan ka mid ah wadamada Dublin warbixintaas oo aad ku bixinaysid hadal ahaan iyo/ama qoraal ahaan oo, markaad arintaas ka hadlaysid in aad isticmaasho luuqadaada hooyo ama luuqad kale oo aad si wanaagsan ugu hadashid (ama inaad hesho turjumaan, haddii aad u baahato). Sidoo kale waxaad heli doontaa koobi qoraal ah oo ka mid ah go’aanka wadan kale laguugu wareejinayo. Sidoo kale waxaa laguu ogalyahay inaad nagala soo xiriirto wixii warbixin dheeri ah iyo/ama inaad la xiriirto xafiiska Haayadda Qaxootiga Aduunka (UNHCR) ee wadankan.

**Haddii ay nala noqoto in wadan kale uu masuul ka noqon karo baadhisdta codsigaaga, waxaad heli doontaa warbixin faahfaahsan oo ku saabsan nidaamka iyo sida ay kuu saamaynayso adiga iyo xuquuqahaagaba.**



## Warbixinta xiriirada, gaar ahaan:

Aqoonsiga iyo macluumaadka meesha lagala xiriirayo maamulka masuulka magangalyada / ilaaliyaha Eurodac

**Waaxda Socdaalka ee hoos timaadda Wasaaradda Arimaha Gudaha**
L. Sapiegos str. 1, 10312 Vilnius
Tel: +370 5 271 7112
Email: md.rastine@vrm.lt
http://www.migracija.lt

Macluumaadka haayadda Kormeerista Maamulka Qaranka (Ilaalinta Xogta)

**Hay'adda Kormeerta Ilaalinta Xogta Qaranka**
A. Juozapavičiaus str. 6, 09310 Vilnius
Tel: +370 5 271 2804, +370 5 279 1445
Email: ada@ada.lt
https://www.ada.lt

Macluumaadka meesha lagala xiriiayo xafiiska UNHCR ee deegaanka

**Xaafiiska Hay'adda Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR) ee Litu'aaniya**
A. Jakšto str. 12, 01105 Vilnius
Tel: +370 5 210 7416
Email: kules@unhcr.org
http://www.unhcr.se/lt/home.html

Macluumaadka meesha lagala xiriirayo IOM

**Xaafiiska Vilnius ee Hay'adda Caalamiga ah ee Socdaalka (IOM)**
A. Jakšto str. 12, 01105 Vilnius
Tel: +370 5 261 0115
Email: iomvilnius@iom.lt
http://www.iom.lt

Macluumaadka meesha lagala xariiro ururada taageera qaxootiga

**Hay'adda Laanqayrta Cas ee Litu'aaniya**
A. Juozapavičiaus str. 10A,
09316 Vilnius
Tel: +370 5 212 7322, +370 686 30 050
Email: info@redcross.lt
http://www.redcross.lt

**Caritas oo ka mid ah Archdiocese ee Vilnius**
Odminių str. 12, 01122 Vilnius
Tel: +370 5 261 1014
Email: info@vilnius.caritas.lt
http://www.vilnius.caritas.lt

BZ-01-14-065-SO-C

doi:10.2847/18122
ISBN 978-92-9243-136-5

European Commission

EASO

MIGRACIJOS DEPARTAMENTAS

Publications Office